

Cudurka Unugyada Dhiiga iyo Xanuunka Sickle Cell Disease and Pain (Somali)

Xanuunka waa dhibaato guud ee carruurta qabta cudurka unugyada dhiiga (SCD). Unugyada dhiiga jiran waxay ku qabaan dhibaato adag inay maraan xididaha yar ee dhiiga. Waxay kordhisaa oo buuxisaa xididada, ka illaalinta oksijiinta inay gasho qeybaha qaar ee jirka (Sawirka 1). Tan ayaa sababto xanuun.


Calaamadaha iyo Aastaamaha

Xanuunka unugyada dhiiga iyo aastaamaha way u kala duwanyihiin canug walba. Canugaaga ayaa laga yaabaa inay u suurto gasho inuu aqoonsado xanuunkooda unugyada dhiiga. Tan ayaa laga yaabaa inay ka duwanaato noocyada kale ee xanuunka canugaaga laga yaabo inuu qabo. Aastaamaha suurto galka ah ee qeybta xanuunka cudurka unugyada dhiiga cas waa:

- Wax dhibaa
- Xanaaq oo ay ku adagtahay raaxada
- Isbadelada dabeecada
- Aaga (aagaga) bararsan, xanuunka badan ee jirka
- Isbadelada rabitaanka cuntada
- Firfircooni ka yar tan caadiga ah, ma rabo inaan ciyaaro
- Ma isticmaalo lugaha, garabka, ama qeybta jirka ee xanuuntaa

Waxa Lagu sameeyo Guriga

Inta badan xanuunka waxaa lagu maareyn karaa guriga iyada oo la raacayo tilmaamaha qeybta jaalaha ee Qorshaha Tallaabada Cudurka Unugyada dhiiga. **Marnaba ha u isticmaalin baraf inaad ku daaweysid xanuunka. Tan ayaa ka sii darsiineyso xanuunka.** Waad ku caawin kartaa inaad yareysid xanuunka canugaaga adiga oo:



Ilaha sawirka: Machadka Cilmi baarista Hidda sidaha Aadanaha Qaranka

Sawirka 1 Qaabka cudurka unugyada dhiiga jiran ayaa xanibo qulqulka dhiiga.

- Codsashada shukumaan diiran, qoyan ama suufka kululeynta ee aaga xanuunka.
- Ha cabaan dareere sida biyaha iyo juuska. Cadadka ku jiro Qorshahaaga Tallaabada Cudurka Unugyada dhiiga.
- Masaajeynta aaga xanuunka badan.
- Helida nasiinyo dheeraad ah adiga oo seexanayo xili hore ama hurdo yar qaadanayo.
- Xoog saarida waxyaabaha aan ka aheyn xanuunka, sida geemamka muuqaalka, muusiga, ama bandhiga talefishanka. Sidoo kale waad la sameyn kartaa neef qaadasho qotoda dheer canugaaga si aad uga caawisid nasashada.
- Siinta daawooyinka xanuunka sida uu kuu tilmaamay dhaqtarkooda ama bixiyaha daryeelka caafimaad. Qaad heerkulka canugaaga ka hor inta aadan siinin daawooyinka xanuunka si aad u hubisid inaysan qabin qandho.

Waqtii walba ee canugaaga guriga ka joogo dugsiga sababtoo ah xanuun, fadlan soo wac kaalisada cudurka unugyada dhiiga. Waxay midaan ku qorayaan jadwalka canugaaga. Haddii canugaaga u baahdo inuu seego dugsig ama aad u baahantahay inaad seegtid shaqada, kaalisada ayaa ku siin karto cudur daarka dugsiga ama shaqada.

Sida looga Hortago Xanuunka

Waxaa jiro caadooyin maalinle ah iyo daawooyin kaa caawin karo ka hortaga ama yareynta xanuunka cudurka unugyada dhiiga.

- Helida hurdo kugu fillan
- Cunista cunto caafimaadan
- Cabida biyo kugu fillan
- Raacida qeybta cagaarka ah ee Qorshahaaga Tallaabada Cudurka Unugyada dhiiga
- Howsha jirka maalinlaha
- Taageerada nafsaaaniga bulshada
- Qaadashada daawada lagu qoray. Kuwaan ayaa ka mid noqon karo hydroxyurea, Endari[®], voxelotor (Oxybryta[®]), ama crizanlizumab (Adakveo[®])

Qaar ka mid ah bukaanada SCD ayaa ka faa'idi karo daaweynada kale sida dhiig ku shubida ama rugta xanuunka.

Goorta la Waco Dhaqtarka

Soo wac kooxda cudurka unugyada dhiiga haddii aad ogtahay in canugaaga u baahanyahay in la arko. Tan ayaa u diyaariso dhaqaatiirta iyo bixiyayaasha daryeelka caafimaadka si markaas ay si wanaagsan ugu daryeelaan canugaaga. Soo wac dhaqtarka ama bixiyaha daryeelka caafimaad haddii canugaaga uu qabo kuwa ka mid ah kuwa xigga:

- Xanuunka aadka u daran ee lagu maareeyo guriga
- Qoorta adag, madax xanuun daran, ama dawaqaad
- Diidaadaa cunista, cabida, ama qaadashada daawada

- Xanuunka aanan dhammaan 2 maalmood kadib oo ku daaweynta guriga
- Xanuunka xabadka ama dhabarka oo ay wehliso qufaca joogtada ah ama dhibaataada neefsashada
- Calool xanuunka daran ama bararka leh maqaarka cas ama inuu aad uga hurdeysnaado sida caadiga ah

Haddii canugaaga jirado, soo wac kaalisada cudurka unugyada dhiiga ee (614) 722-8914 Isniin illaa Jimcaha laga bilaabo 8 a.m. illaa 4:30 p.m. Haddii aanan la heli karin, ka soo wac Rugta Cudurka Unugyada dhiiga (614) 722-3250. Maqribyada, dhammaadyada isbuuca, iyo fasaxyada, soo wac (614) 722-2000. Ku weydii dhaqtarka dhiiga wacitaan.

Goorma ayay tahay in la waco 911

U soo wac 911 wixii caawin degdeg ah haddii canugaaga:

- U neefsanayo si tartiib ah ama joojiyo neefsashada.
- Uusan kici karin hurdada yar kadib.
- Uusan jawaab laheyn oo uusan kula hadli karin.
- Uu qabo tabar dari lama fillaan ah, luminta dareenka, ama uusan dhaqaajin karin qeybta jirka.